



# Bayaanka ka hortagga gudniinka Hablaha

Gudniinka habluhu waa  
fal-dembiyeed

*Had iyo jeer Bayaankan sii qaado markaad dibadda u socdaalayso. Ehelkaaga halkaas ay joogaan ayaad Bayaankan ku tusi karta. Sidaas ayay ku ogaanayaan in Nederlaan gudniinka hablaha uu yahay fal-dembiyeed iyo in waalidiinta la siin karo xukun xabsi haddii ay gabadhooda gudaan.*

**Boqortooyada Nederlaan**

**Gudniinka habluhu waa fal-dembiyeed, maadaamo uu yahay nooc xadgudub oo halis ah. Gudniinka habluhu xuquuqda ilmaha iyo haweenka ayuu jabinaya.**



**Nederlaan gudaheeda, fulinta gudniinka habluhu waa fal-dembiyeed. Cigaabta xabsi waxay gaadhi kartaa ilaa ugu badnaan 16 sanno.**

## **Gudniinka habluhu waa mamnuuc**

Nederlaan, dhammaan noocyada kala duwan ee gudniinka habluhu waa mamnuuc. Waa mamnuuc in la gudo gabadh ku nool Nederlaan. Xitaa haddii ay taasi ka dhacdo dibadda.

IQof kasta oo Nederlaan gudaheeda gudniinka hablaha fuliya amba ka qaybqaata qalliinka fal-dembiyeed ayuu galay. Tani waxay khusaysaa qof kasta oo ku nool Nederlaan, xitaa dadka aan haysan sharciga degenaanshaha. Waalidiinta gabadhooda ku soo guda dibadda waxaa lagu cigaabi karaa Nederlaan. Xubnaha ehelka amba dadka kale macal fal-dembiyeed ayay galayaan haddii ay (soo) gudaan gabadh Nederlaan ka timi, xitaahaddii ayagu ku noolayn Nederlaan.

## Fulinta gudniinka hablaha xukun xabsi ah ayaa u yaal

Nederlaan gudniinka habluhu waa fal-dembiyeed oo sida qaabka xadgudub-carruurta loo ciqaabo. Ciqaabtu way kala duwan tahay oo ganaax lacageed ilaa ugu badnaan 16 sanno oo xadhig ah ayay noqon karta. Garsooraha ayaa go'aamiya xadka xukunka (Qod. 300 ilaa 304 ee Buugga-Xeerka Ciqaabta).

Waalidiinta gudniinka gabadhooda fuliya/sameeya ciqaab sare ayaa la siinaya (Qod. 304, cutubka 1.1. Buugga-Xeerka Ciqaabta).

Sidoo kale waalidiinta waa la ciqaabayaahaddii ay:

- hawlgalka gudniinka diyaariyaan;
- qof ay falaan in gudniinka sameeyo;
- ka caawiyaan gudniinka.

Waalidiinta lagu xukumay inay gudeen gabadhooda oo aan haysan baasaboortan Nederlaan ah, ayaa halis ugu jira inaan loo oggolaan inay Nederlaan sii degganaadaan.

**Hablaha iyo haweenka la guday wax eed ah ma leh, lamana ciqaabayo.**

## **Gudniinka habluhu wuxuu halis ku yahay caafimaadka**

Hablaha marka la gudayo way dhiig bixi karaan amba caabuq ayay yeelan karaan. Sidaas darteed aad bay ugu xanuunsan karaan iyo xitaa u dhiman karaan. Gudniinka dabadeed waxaa laga yaabaa inay cabashooyin yeeshaan. Sidaas darteed marka ay kaadinayaan xanuun ayay yeeshaan, cabashooyin caadada ah, caabuqa kaadi mareenka ah, dhibaatooyin galmada ah, dhalmo la'aan iyo dhibaatooyin marka dhalmada ah. Hablaha waxaa ku dhici kara niyad-jab iyo waxayna yeelan karaan cabashooyin cabsi ah iyo saameyn taban ayay ku yeelan karta waayo-galkooda galmo. Haween badan ayaa noolashooda oo dhan xanuun amba cabashooyin yeesha gudniinka awgiis.

### **Waa maxay sababta bayaanka?**

'Bayaanka ka hortagga gudniinka hablaha' waa caddayn ay hablaha iyo waalidiintu ay tusi karaan ehelkooda iyo dadka kale ee ay khusayso. Bayaanka waxaa ku yaal in gudniinka habluhu xeerka Nederlaan fal-dembiyeed ka yahay, xitaa marka qalliinku dibadda ka dhaco. Fulinta iyo ka qaybqaadashada gudniinka hablaha labaduba waa fal-dembiyeed.

### **Waa maxay gudniinka habluhu?**

Gudniinka habluhu waa qalliin lagu sameeyo xubinta taranka haweenka ee banaanka iyada oo caafimaad/daweyn ahaan loo baahnayn.

## Maxaan sameeyaa haddii aan tuhun iga hayo gudniinka hablaha?

Waxaad la xidhiidhi kartaa Veilig Thuis si aad u hesho caawimo (macal si qarsoodi ah haddii la rabo).

Taleefannambar:



**0800 2000**

(bilaash 24/7 la helayo)



Website

**[veiligthuis.nl](http://veiligthuis.nl)**

## Halkee ka heli karaa caawimo?

Wax su'aalo ah ma ka qabtaa gudniinka hablaha amba Bayaankan? Markaa waxaad marwalba ballan ka samaysan kartaa dhakhtarkaaga-xaafadda, Veilig Thuis amba dhakhtarkaaga amba kalkaalisada Xanaanada-carruurta/ Daryeelka Caafimaadka Dhallinyarada ee GGD.

Waxaad ka heli kartaa ururka caafimaadka dhallinyarada ee deegaankaaga amba GGD [vzinfo.nl/gebiedsindelingen/preventie](http://vzinfo.nl/gebiedsindelingen/preventie)

Warbixin dheeraad ah halkan ayaad ka helaysa [meisjesbesnijdenis.nl](http://meisjesbesnijdenis.nl) iyo [fsan.nl/vgv](http://fsan.nl/vgv).

Waxaad macal ka hadli kartaa xaaladda aad ku sugan tahay amba xaalad aad ka shakisan tahay adigoon magacaaga sheegin. Shaqaalaha Veilig Thuis waxay diyaar u yihiin inay ku dhegaystaan iyo ay ku siiyaan talo. Tusaale ahaan, waxay kuu sheegi karaan meesha aad ka heli karto caawimada saxda ah.

Haddii aad dibadda joogto oo aad u baahan tahay caawimo amba talo, waxaad marwalba la xidhiidhi kartaa xarunta-xidhiidhka ee 24/7 ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda.



**Taleefannambar:**

(Kharashka wicitaanka ee caadiga ah)

**+31 247 247 247**



**Whatsapp**

**+31 68 23 87 796**

Bayaankan waxaannu ka rabnaa inuu hablaha intii ka suurtoagal ah uu ka magangeliyo gudniinka hablaha, si ay jidh iyo nafsi/maskax ahaan si caafimaad leh ay u koraan. Sidoo kale waxaannu rabnaa inaannu sidan xuquuqda xorriyadda dookha haweenka iyo hablaha aannu ku wanaajinno.



Ministry of Health, Welfare and Sport

Agaasimaha caafimaadka, Wanaagga iyo Isboortiga



Ministry of Education, Culture and Science

Wasiirka Waxbarashada, Dhaqanka iyo Sayniska

Wasiirka Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare



Ministry of Justice and Security

Wasiirka ilaalinta sharciga



Ministry of Foreign Affairs

Wasiirka Arrimaha Dibadda



Ministry of Social Affairs and Employment

Wasiirka Arrimaha Bulshada iyo Shaqaalaysiinta

Wasiirka Ganacsiga iyo Horumarinta isla Shaqeynta

## **Talo**

La xafid bayaankan dokumeentigaaga dhoofka.  
Markaas waxaad qaadan kartaa bayaanka markasta  
oo aad u socdaalayso dibadda.

### **Tani waa daabacaadda:**

Wasaaradda caafimaadka, Wanaagga iyo Isboortiga  
Wasaaradda Cadaaladda iyo Amniga

Maayo 2024